

Somaliska

KUSOO DHAWOOW
booqasho
5-sanno ah!



Salaam masuul!

Ilmahaagu waxa uu bilaabayaa dugsiga sanad ama wax ka badan. Booqashadaada, kalkalisada ayaa kula wehelin doonta, soo koobaysa caafimaadka iyo korriinka ilmaha laga bilaabo dhalashada ilaa maanta.

Waxaan kuu soo diri doonaa xogwaraysi si looga jawaabo. Soo qaado foomka marka aad na soo booqato.

Adiga oo ah waalidka dhalay ilmaha aya ugu aqoon badan waxayabaha ku saabsan ilmahaaga inta lagu jiro booqashadana waxaad dabcan weydiin kartaa dhammaan su'aalaha aad rabto. Tusaale ahaan, su'aalaha ku saabsan barbaarinta, caafimaadka ilmaha iyo korriinka, hurdada, cuntada, caadooyinka musqulaha iyo wanaaggaaga waalid ahaan.

Carruurtu waxay jecel yihiiin inay ogadaan waxa dhici doona, si la mid ah annagoo dad waaweyn ah. Iyadoo laga caawinayo faylkan, waxaad u diyaarin kartaa ilmahaaga adigoo u sheegaya waxayabaha ku saabsan booqashada iyo waxa uu ilmuhi mari doono.

Talaalka ka hortagga gawracatada, teetanada, xiiqdheerta iyo dabaysha aya sidoo kale lagu bixiyaa booqashadaada (waa hal ul irbad oo keliya waxaana badanaa laga bixiyaa muruqa cududda sare).

Haddii aad dareento inaad sidoo kale la tashanayso takhtar inta lagu jiro booqashadaada, waxaad u baahan doontaa inaad si fiican ula xidhiidho xarunta daryeelka carruurta ka hor booqashadaada.

Sawir koodka QR ama booqo wabsaaytka 1177.se/jamtland-harjedalen/barn. Waxaa jira xaqiiqooyin iyo talo ku saabsan caafimaadka carruurta, korriimadooda, xuquuqdooda, xanuunkooda iyo daryeelka. Macluumaadka ku saabsan barbaarinta waa la akhriyi karaa.



Salaam carruureey!

Hadda waa waqtigii booqashadaada 5-sano ah ee xarunta caafimaadka carruurta. Booqashadan, adiga iyo waalidka(waalidiinta) waxaad la kulmi doontaan kalkaaliye

Tani waa waxa aad samayn doonto inta lagu jiro booqashadaada:

Waa lagu cabbiri doonaa waxaana laguu qaadi doonaa si loo arko inta aad kortay ilaa booqashadi ugu dambeysay.




Ku istigaadida hal lug




Qaado tallaal



Sawiritaanka iyo jarida



Hel boolbaro aad ku ciyaarto



Tirinta





Haddii aad wax su'aalo ah qabtid ka hor booqashadaada,
fadlan la xidhiidh xarunta caafimaadka ilmahaaga.